Farriimaha qoraalka ah ee Apple Health

Laga bilaabo bisha Maajo 2023-ka, Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) ayaa wuxuu farriimo qoraal ah u dirayaa macaamiisha si uu ugu wargeliyo in ay dib-u-cusbooneysiin sameeyaan si ay caymiska ugu sii jiraan.

HCA ayaa sidoo kale isaga oo ka wakiil ah Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) u diraya farriimo qoraal ah macaamiisha u baahan in ay soo gudbiyaan dib-u-eegista xaq-u-yeelashada.

Apple Health (Medicaid)

Caymiska Apple Health waxaa ku jira shakhsiyaad:

- Qaangaar ah oo ay da'doodu u dhaxeyso 19 ilaa 64 sano jir.
- U codsanaya carruur.
- Waalid ama daryeele ah oo la codsnaya carruur.
- Haween uur leh ah ama u codsanaya haween uur leh.

Farriin qoraal ah

Macaamiisha Apple Health waxaa laga yaabaa in ay helaan farriimahan qoraalka ah ee soo socda haddii la gaarey waqtigii dib-u-cusboonaysiinta caymiskooda.

Apple Health (Medicaid): Inta goor ee ay farriinta soo noqnoqota ayaa kala duwan. Qiimayaasha farriinta iyo daatada ayaa ku dabaqmi kara. Ku soo jawaab STOP si aad uga baxdo. Si aad u hesho caawimaad ama si aad u eegto T&Cs, booqo hca.wa.gov/text
Waa waqtigii dib-u-cusboonaysiinta caymiska Apple Health si aad u sii caynsanaato. Booqo wahealthplanfinder.org ka hor inta aysan bisha dhammaan.

Sideen u sameyn karaa dib-u-cusbooneysiinteyda?

Waxaa jira dhowr ikhtiyaar oo caymiska lagu cusbooneysiin karo:

- **Barta Internet-ka**: Booqo Washington Healthplanfinder.
- **App-ka telefoonka gacanta:** Soo degso app-ka WAPlanfinder**.**
- **Telefoonka**: Ka wac Xarunta Taageerada Macmiilka ee Washington Healthplanfinder lambarkan 1-855-923-4633.
- **Waraaq**: Soo gudbi Codsiga caymiska daryeelka caafimaadka (18-001P).
- **Shakhsi-ahaan**: Kheyraadka degaanka kuwaas, iyaga oo aan laga qaadin kharash dheeri ah, ka caawin kara macmiisha in ay codsadaan caymis caafimaad.
  Kaalmada isqoritaanka maxalliga ah | Khariidad

Ogow wax badan oo ku saabsan dib-u-cusbooneysiinta caymiska.

Classic Medicaid

Caymiska Classic Medicaid waxaa ku jira shakhsiyaad:

- Qaangaar ah oo ay da'doodu tahay 65 ama ka weyn.
- Indhoole ama naafo ah.
- Xaq u leh Medicare.
- U baahan adeegyo ama taageero muddo-dheer soconaya.

Waxaan helaa caymis daryeel caafimaad oo loo marayo DSHS. Maxay tahay sababta uu HCA farriin iigu soo dirayo?

HCA waa hay'adda Medicaid ee Gobolka Washington, waxaannu kuu soo direynaa farriinta qoraalka ah annaga oo ka wakiil ah DSHS. DSHS ayaa u maamusha Medicaid, oo sidoo kale loo yaqaanno Classic Medicaid, dadka ay da'doodu ka weyn tahay da'da 65, ee ku jira Medicare, ama naafada ama dhegoolaha ah.

Farriin qoraal ah

Macaamiisha Classic Medicaid ee halaya caymiska loo marayo DSHS waxaa laga yaabaa in ay helaan farriimahan qoraalka ah ee soo socda haddii la gaaro waqtigii dib-u-cusboonaysiinta caymiskooda.

Apple Health (Medicaid): Inta goor ee ay farriinta soo noqnoqoto ayaa kala duwan. Qiimayaasha farriinta iyo daatada ayaa ku dabaqmi kara. Ku soo jawaab STOP si aad uga baxdo. Si aad u hesho caawimaad ama si aad u eegto T&Cs, booqo hca.wa.gov/texts
Waxaa la joogaa waqtigii la sameyn lahaa dib-u-eegisyada xaq-u-yeelashada DSHS si aad u sii caynsanaato. Booqo washingtonconnection.org ka hor inta aysan bisha dhammaan.

Sideen u sameyn karaa dib-u-eegista xaq-u-yeelashadeyda?

Waxaa jira dhowr ikhtiyaar oo caymiska lagu cusbooneysiin karo:

- **Barta Internet-ka**: Booqo Washington Connection.
- **Waraaq**: Soo gudbi Codsiga loogu talagalay caymiska daryeelka muddada-dheer/naafada, indhoolaha, waayeelka (HCA 18-005).
- **Telefoonka**: Codso codsiga adiga oo wacaya 1-877-501-2233.
- **Shakhsi-ahaan**: Booqo xafiiska Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (DSHS) ee degaanka.
    - Loogu talagalay caymiska Naafada, Indhoolaha, ama Waayeelka: Xafiiska Adeegyada Bulshada ee DSHS
    - Loogu talagalay Taageerada iyo Adeegyada Muddada-Dheer: Xafiiska Adeegyada Bulshada iyo Guriga

Ogow wax badan oo ku saabsan dib-u-cusbooneysiinta caymiska.

U wareegidda Classic Medicaid ama Medicare

Farriin qoraal ah

Macaamiisha u wareegaysa caymiska Classic Medicaid ama Medicare waxaa laga yaabaa in ay heleen farriimahan qoraalka ee soo socda haddii la joogo waqtigii ay u wareegi lahaayeen caymiskooda ugana codsan lahaayeen DSHS. Tani waxay dhacdaa marka macmiilka uu jirsado da'da 65 ama uu noqdo mid u qalma Medicare.

Apple Health (Medicaid): Inta goor ee ay farriinta soo noqnoqota ayaa kala duwan. Qiimayaasha farriinta iyo daatada ayaa ku dabaqmi kara. Ku soo jawaab JOOJI si aad uga baxdo. Si aad u hesho caawimaad ama aad u eegto T&Cs, booqo hca.wa.gov/help
Tallaabo qaad hadda si aad u codsato Barnaamijyada Kaydka Medicaid ama Medicare. Booqo washingtonconnection.org ka hor inta aysan bisha dhammaan.

Sideen u codsadaa Classic Medicaid ama Medicare?

Waxaa jira dhowr ikhtiyaar oo caymiska lagu codsan karo:

- **Barta Internet-ka**: Booqo Washington Connection.
- **Waraaq**: Soo gudbi Codsiga loogu talagalay caymiska daryeelka muddada-dheer/naafada, indhoolaha, waayeelka (HCA 18-005).
- **Telefoonka**: Codso codsiga adiga oo wacaya 1-877-501-2233.
- **Shakhsi-ahaan**: Booqo xafiiska Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (DSHS) ee degaanka.
    - Loogu talagalay caymiska Naafada, Indhoolaha, ama Waayeelka: Xafiiska Adeegyada Bulshada ee DSHS
    - Loogu talagalay Taageerada iyo Adeegyada Muddada-Dheer: Xafiiska Adeegyada Bulshada iyo Guriga

Ka ogow wax badan oo ku saabsan dib-u-cusbooneysiinta caymiska.

Su'aalaha inta badan la isweydiiyo

Maxaan u helayaa farriintan qoraalka ah?

Diiwaannadeena waxay muujinayaan in adiga ama wakiilkaaga idman (AREP) aad ina siiseen lambarkaaga teleefoonka. Waxaan u baahanahay adiga ama AREP-kaaga in aad sameysaan dib-u-cusbooneysiintaada si aad u caynsanaato. Haddii aad dhowaan qaadatey lambarkan telefoonka oo aadanna ahayn macmiilka Apple Health mise Medicaid, waxaad iska indho-tiri kartaa qoraalka oo aadna ka bixi kartaa.

Lambarkee ayay farriinta qoraalka ah ka imaaneysaa?

HCA wuxuu farriimaha qoraalka ah ka soo dirayaa 888-689-5016.

Ka waran haddii aanan haysan caymiska Apple Health ama Classic Medicaid?

Haddii aadan haysan Apple Health ama Classic Medicaid, waxay u badan tahay in aannu haysano lambar telefoon khalad ah ama mid hore uu u lahaa qof lahaa caymiska. Looma baahna in aad wax tallaabo ah qaado waxaadna ku jawaabi kartaa “STOP” si aadan u helin farriimo dheeraad ah.

Waxaad haysataa Apple Health haddii aad haysato kaarka adeegyada ProviderOne ama laguu qoondeeyo qorshaha daryeelka la maareeyo. Qorsheyaasha daryeelka la maareeyo waa:

- Amerigroup Washington
- Coordinated Care of Washington
- Community Health Plan of Washington
- Molina Healthcare of Washington
- UnitedHealthcare Community Plan

Intee jeer ayaan heli doonnaa farriinta qoraalka ah?

Hadda, waxaan keliya direynaa farriimaha qoraalka ah marka qof reerka ka tisan uusan soo gudbin dib-u-eegista xaq-u-yeelashada ama dib-u-eegsita ee loo baahan yahay. Haddii aad isku qorto helidda farriimaha qoraaka ah ee laga helo qorshaha daryeelka la maareeyo, waxay kaloo kuu soo diri karaan farriin qoraal ah.

Ka waran haddii aanan dooneyn wax farriimo qoraal ah?

Farriinta ugu jawaab “STOP” si aadan mar kale u helin farriimaha qoraalka ah.

Waxaan helay farriin qoraal ah oo sheegaysa in aan lacagta telefoonka ku bixiyo si aan u sii lahaado caymiska. Ma runbaa?

HCA, DSHS, iyo Washington Healthplanfinder marnaba cid ma weyddiiyaan lacag ay isku qoraan ama dib isugu qoraan caymiska Apple Health. Khiyaanoolayaal tuugo ah ayaa farriimo u diraya ama wacaya macmiisha iyaga oo u sheegaya in ay lacag bixiyaan si ay u cusbooneysiiyaan caymiskooda Medicaid. Hala wadaagin macluumaadka kaarkaaga amaahda ama bankiyada qof sheegaaya in uu ka socda HCA, DSHS, ama Apple Health.

Haddii aad hesho wacitaan telefoon ama farriin qoraal ee aad u maleyso in ay qiyaanno yihiin, ku jar oo haka jawaabin. Waxaad ugu soo sheegi kartaa cabashooyinka khiyaannada suuragalka ah HCA:

- Email-ka: WAHeligibilityfraud@hca.wa.gov
- Farriin codeed: (360) 725-0934
- Fakis: (360) 725-1158, Attn: WA Apple Health Fraud

Kumaan kala xiriiri karaa su'aalaha?

Apple Health (Medicaid): Haddii ay da'daadu ka yar tahay 65, carruur haysato, ama aad uur leedahay, ka wac Xarunta Adeegga Macmiilka ee Gargaarka Caafimaadka HCA 1-800-562-3022 ama email u dir askmagi@hca.wa.gov.

Classic Medicaid: Haddii ay da'daadu tahay 65 ama ka weyn, oo aad ku jirto Medicare, ama aad tahay qof naafo ama indhoole ah, ka wac Xarunta Adeegga Macmiilka DSHS lambarkan 1-877-501-2233.

Siyaasadda asturnaanta iyo shuruudaha war-lalinta fiilo la'aanta ah (wireless-ka)

Waxaad isku qortay in aad ka hesho farriimo war-lalin fiilo la'aanta ah (wireless) Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington. Marka aad isku qorto adeeggan digniinta, waxaad ogoshahay Shuruudahan soo socda. Si aad u joojiso helidda farriimaha, u dir STOP si aad uga baxdo rukumashada. Si aad u hesho caawimaad, u dir HELP.

Bixiyeyaasha adeegga war-lalinta fiilo la'aanta ah (wireless-ka) badankoodu waxay bixiyaan adeegyada dirista farriimaha qoraalka ah. In kastoo aanu jirin lacag la isugu diiwaangelinayo wararkii ugu dambeeyay ee war-lalinta fiilo la'aanta ah (wireless-ka), bixiyaha adeeggaaga wireless-ka ayaa waxaa laga yaabaa in uu kugu soo dalaco lacag farriin kasta. La eeg adeeg-bixiyahaaga faahfaahinnada kharashka dheeraadka ah.

Shuruudaha

Asturnaanta Adeegsadaha
Maamulka Daryeelka Caafimaada ee Gobolka Washington ma wadaagi doonno ama uma adeegsan doonno lambarka telefoonkaaga ujeeddo kale oo aan ahayn wararkii ugu dambeeyay ee laga helo macmiilka la xushay.

Ujuurroyinka Adeegsadaha
Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington lacag kuma dalaco helayaasha si ay u helaan farriimaha qoraalka ah. Si kastaba ha ahaatee, qiimayaasha farriinta iyo daatada ayaa ku dabaqmi kara.

Inta-jeer ee La Qaato
Inta goor ee ay farriinta soo noqnoqota ayaa kala duwan.

Ka-Bixidda
Si aad uga Baxdo (jooji in aad hesho farriimaha), uga jawaab STOP adiga oo ka diraya aaladaada telefoonka. Waxaan ka bixidaada ku xaqiijin doonnaa qoraal oo kama heli doontid wax farriimo dheeraad ah Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington haddii aad Dib ugu biirto mooyaane.

Damaannad
Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington mas'uul kama ahan dib-u-dhacyo kasta ee ku yimaada helidda farriimo SMS kasta ee la xiriira barnaamijkan. In ay ku soo gaaraan farriimaha SMS waxay ku xiran tahay gudbinta taabogalka ah ee bixiyaha adeegaagga wireless-ka/shirkadda shabakada. Dhambaal-sidayaasha mas'uul kama ahan farriimaha soo daaha ama aadan helin.

Isticmaal Sharraxaadda Kiiska
Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington ma diri doonno farriimo SMS ah oo la xiriirra macluumaad iyo digniino ku saabsan adeegyada dowladda ee uu bixiyey Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington.

Su'aalo?

Haddii aad qabto su'aalo ama dhibaatooyin ama aad caawimaad u baahan tahay, fadlan la soo xiriir support@granicus.com.

Siyaasadda Asturnaanta

Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington wuxuu ixtiraamayaa asturnaantaada. Waxaan keliya u isticmaali doonnaa macluumaadka aad bixiso in aan ku soo gudbinno farriintaada qoraalka ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaannu had iyo jeerba ilaalin doonnaa xuquuqda shaacinta macluumaad kasta hadba sida ay lagama maarmaan u noqoto si loo qanciyo sharci, xeernidaamiye, ama codsi dowladeed kasta, si looga fogaado mas'uuliyadda, ama si loo ilaaliyo xuquuqaheenna ama hantideenna.

Marka aad barta internet-ka ka buuxiso foomamka ama si kale u siiso hay'adda macluumaadka ku xirnaanta adeegga farriinta wireless-ka ah, waxaad oggoshahay in aad bixiso macluumaad dhab ah, sax ah, oo dhammeystiran. Waxaad oggoshahay in aadan adeegsan magac been ama marin-habaabineed ama magac aan laguu oggolayn in aad adeegsato. Haddii annaga, iskeenna, u aammino in macluumaad kasta oo noocaasi ah in uu been yahay, aan sax ahayn, ama uusan dhammeystirnayn, waxaan diidi karnaa in aad hesho adeegga iyo in aad raadiso xalalka sharci kasta ee habboon.